NEWS RELEASE

# Dowladda Kanada ayaa soo saartay Miisaaniyadda 2023

*Miisaaniyadda federaalku waxay taageeri doontaa dabaqad dhexe oo xoog badan, dhaqaale la awoodi karo, iyo mustaqbal caafimaad leh oo reer Kanada.*

Maarso 28, 2023 Ottawa, Ontario Waaxda Maaliyadda Kanada

Maanta, Mudan Chrystia Freeland, Ra'iisul Wasaare Ku-Xigeenka iyo Wasiirka Maaliyadda, ayaa sii deeyseyy *Miisaaniyadda 2023-Qorshe lagu sameeyey-Kanada: Dabaqad Dhexe oo Xoog leh, Dhaqaale La Awoodi Karo, Mustaqbal Caafimaad leh.*

Kanada waxay si cajiib ah uga soo kabatay hoos u dhacii dhaqaale ee uu keeenay COVID. Kobaca dhaqaalaha Kanada ayaa ahaa kii ugu xoogganaa G7 sanadkii la soo dhaafay, maantana, 830,000 oo Kanadian ah oo aan shaqayn jirin masiibada ka hor ayaa shaqaysa. Sicir-bararka Kanada ayaa hoos u dhacay siddeed bilood oo isku xigta, heerka shaqala'aantayadu waxay ku dhowdahay heerkii ugu hooseeyay, iyada oo ay taageerto nidaamka Kanada Guud ee waxbarashada hore ee la awoodi karo iyo daryeelka carruurta, heerka ka qaybgalka xoogga shaqada ee haweenka da'doodu u dhaxayso 25 ilaa 54 oo gaadhay rikoor sare oo ah 85.7 boqolkiiba bishii Febraayo.

Miisaaniyadda 2023 waxay ku dhisan tahay horumarkan muhiimka ah.

Iyada oo loo marayo Kabidda Cuntada ee cusub, Miisaaniyadda 2023 waxay bixisaa gargaarka sicir-bararka oo ku wajahan 11 milyan oo Kanadian ah iyo qoysaska sida aadka ah ugu baahan, iyada oo ilaa $467 dheeraad ah la siinayo lammaanayaasha xaqa u leh ee carruurta leh; $234 dheeraad ah oo loogu talagalay dadka Kanadiyaanka ah ee aan carruurta lahayn; iyo $225 dheeraad ah oo loogu talagalay waayeelka, isku celcelis ahaan. Dawladdu waxa kale oo ay qaaddaa tallaabo ay ku xakamaynayso khidmadaha qashinka ah ee qarsoon iyo amaahda ugaadhsiga ah, hoos u dhigida khidmadaha wax kala beddelashada kaadhka amaahda ee ganacsiyada yaryar, iyo inay ku caawiso dadka Kanadiyaanka ah inay lacag badan jeebkooda ku haystaan.

Si loo xoojiyo nidaamka daryeelka caafimaadka guud ee Kanada, Miisaaniyadda 2023 waxay bixisaa $198.3 bilyan si loo dhimo dib u dhacyada, loo balaadhiyo helitaanka adeegyada caafimaadka qoyska, iyo in la hubiyo in gobollada iyo deegaannadu ay bixin karaan daryeelka caafimaad oo taya sare leh iyo waqtiga ku habboon ee Kanadiyaanku filanayaan oo ayna mudan yihiin. Miisaaniyadda 2023, dawladdu waxay sidoo kale soo bandhigaysaa Qorshe cusub oo Daryeelka Ilkaha ee Kanada, si ay uga faa'iidaystaan ilaa sagaal milyan oo Kanadiyaan ah iyo in la hubiyo in qof Kanadian ahi uusan kala dooranayn daryeelka ilkahiisa iyo bixinta biilasha dhammaadka bisha.

Miisaaniyadda 2023 waxa ay samaysaa maalgashi wax-ka-beddel ah si loo dhiso dhaqaala nadiif ah ee Kanada, loola dagaallamo isbeddelka cimilada, iyo u abuurista fursado cusub ganacsatada

Kanada iyo shaqaalaha Kanada. Tan waxaa ka mid ah tallaabooyin muhiim ah oo keeni doona tamar nadiif ah oo la awoodi karo, taageerada maalgashiga bulshooyinkeenna iyo abuurista shaqooyin mushahar fiican leh, iyo hubinta in shaqaalaha Kanada ay awoodaan inay soo saaraan oo ay bixiyaan alaabta iyo agabka ay Kanadiyaanka iyo xulafadayadu u baahan yihiin..

Iyada oo leh qorshe maaliyadeed oo mas'uul ah oo muujin doona Kanada inay sii waddo hoos u dhigga ugu hooseeya iyo saamiga ugu hooseeya ee deynta-GDP ee G7, Miisaaniyadda 2023 waxay gacan ka geysan doontaa dhisidda Kanada ammaan badan, waarta, oo awood badan siinaysaa dadka min xeeb ilaa xeeb.

## Xigasho

"Weligay sida aan maanta ahay ugama rajo badnaan mustaqbalka dalkeenna. Miisaaniyadda 2023 waxa ay dadka Kanadiyaanka ah ee sida aadka ah ugu baahan u keeni doonta gargaar cusub oo lala beegsaday; daryeel caafimaad dadweyne oo xooggan, oo ay ku jiraan daryeelka ilkaha ee malaayiin Kanadiyaan ah; iyo maalgashi la taaban karo si loo dhiso dhaqaala nadiif ah ee Kanada. Waqtiga adag ee adduunka adag, ma jirto meel ka wanaagsan Kanada. "

*Mudan Chrystia Freeland, Ra'iisul Wasaare Kuxigeenka iyo Wasiirka Maaliyadda*

## Waxyaalo la xiriira

- *Miisaaniyadda 2023: Qorshe Kanada lagu sameeyey, Dabaqad dhexe oo xoog leh, Dhaqaale La Awoodi Karo, Mustaqbal Caafimaad leh.*
- Miisaaniyadda 2023: Khudbaddii Ra'iisul Wasaare Ku Xigeenka iyo Wasiirka Maaliyadda
- Asalka: Daryeel Caafimaad Dadweyne oo Xoog Badan
- Asalka: Ka Dhigista Nolosha Mid la Awoodi Karo
- Asalka: Meel la Awoodi Karo oo Loogu Yeero Guri
- Asalka: Qorshe-Kanada-Lagu-sameeyay: Tamar la Awoodi Karo, Shaqooyin Wanaagsan, iyo Dhaqaale Nadiif ah oo Koraya
- Asalka: Dib-u-Heshiisiin Horumarsan
- Asalka: Bulsho Xoog Badan oo Loo Wada Dhan Yahay
- Asalka: Hagaajinta Adeeg Bixinta

## Xiriirada

**War baahintu way la xiriiri kartaa:**

Adrienne Vaupshas
Xoghayaha Warfaafinta
Xafiiska Ra'iisul Wasaare ku xigeenka ahna Wasiirka Maaliyadda
Adrienne.Vaupshas@fin.gc.ca

Xiriirka Warbaahinta
Waaxda Maaliyadda Kanada
mediare@fin.gc.ca
613-369-4000

**Xograadinta Guud**
Telefoon: 1-833-712-2292
Dhegoolayaasha (TTY): 613-369-3230
financepublic-financepublique@fin.gc.ca